بِسْمِ اللهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيْمِ

# DUULAANKA MASKAXDA

# SIRTII ADKEYD

## Qeybta 1

ASMO KHALID

**2024**

Schrijver: Asmo Khalid

Coverontwerp: Asmo Khalid

ISBN: 9789403748221

❖

Buugaan inaan qoro riyadeyda ayeey aheyd. Ilaahay ayaa mahada iskaleh riyadeyda ii rumeeyay. Mudo dheer ayaan arimahaan raadin jiray. Daraaseyn jiray.

Ilaahay ayaa wadada ii fududeeyay ٱلْحَمْدُ لِلَّه. Buugaan inta aan ku fikirin xitaa inaan qoro. Xaalado adag oo kala duwan ayaan la kulmay. Waxyaalo badan aan rajeen jiray wey ii suurto geli waayeen.

Markaas ayaan Istikharo ka dukaday. Waan duceystay. Ilaahay ayaan talada u dhiibtay. Markaas ayaan is dhahay. Allihii ku abuuray ayaaba joogee. Maxaa naftaada u dhibaato gelineysaa? Aduunyo darteeda miyaad u fikireysaa?

Dunidaan waxa yaalo iyo waxa dulsaaran oo dhan Ilaahay swt ayee adoomo u yihiin. Aakhiro iyo Aduunba. Wixii aad rabtid Ilaahay gacantiisa ayeey ku jiraan. Ilaahay talo saaro. Alle bari horta.

وَمَن يَتَّقِ ٱللَّهَ يَجْعَل لَّهُۥ مَخْرَجًا '' Ruuxii Eebe ka dhawrsadana wuxuu u furi faraj''.

Hadii aad Ilaahay si dhab ah u talo saarato. Meel aadan filaneynin ayuu Ilaahay swt faraj kaaga furayaa. Adigoon ogeyn, oo waligaaga aadan ku firin. Sheeko dheer hadii aan soo koobo.

Buugaan fikradihii iyo wax walbo aan u baahnaa oo dhan. Ilaahay swt markii oo ii fududeeyay. Oo wax walbo aan rabay gacanta ley geliyay. Kadib ayaan aniga dib isku guray.

Nafteyda ayaan cudurdaar u raadin jiray. Si aan waxba u qabanin. Anigoon heysanin wax cudurdaar ah, oo ii diidaya inaan shaqadaan gudo galo.

Nafteyda ayaan u raadin jiray sabab aan buugaan ku qorin. Mararka qaarkii waxaan is dhihi jiray. ''Koorso ka samee.''

Mararka kalane waxaan is dhihi jiray, ‘’oo u sug. Hada waxba ha qabanin. Xoogaa sug. Aduunyo roor malagu gaaro.” Nafteyda ayaan beentaas u sheegi jiray. Saan tilaabo u qaadin.

(Laakin dhabta ayaa ah, dadka waxey ku kala hormareyn dunidaan inay tahay orodkaas iyo cararkaas. Aduunyo iyo aakhiraba, waqtiga lagu siiyay ka faaideyso).

Waqtigaaga wuu yar yahay. Waa mid xisaabsan. Waqti badan ma heysatid.

**Cudurdaarkaan nafteyda ku dhihi jiray waxaa ka mid ah:**

- Markaan sidaan iyo sidaan sameeyo kadib ayaan qori doonaa buugaan.
- Markaan waqti helo ayaan qori doonaa buugan.
- Markaan firaaqoobo.
- Markaan wax barto.
- Markaan waxbarashada dhameeyo.
- Markaan guursado kadib ayaan waqti heli doonaa.
- ”Laakin hadaa guursatid. Caruur ayaad dhaleysaa”.
- Ok. Wax ma dhibaayo.
- ”Markaan ilmo dhalo kadib ayaan buugaan qori doonaa”.
- Laakin.
- Markaa ilmo dhashid kadib. Ilmo koris ayaad galeysaa. Caruur yar yar ayaa kuu joogta, ilmahaasna xaq ayeey kugu leeyihiin. Waqtigaaga oo dhan iyagaa qaadanaya.
- ”Waa sax.”
- Haye. Markaan ilmaha korsado ayaan waqti heli doonaa, markaas kadib ayaa buugaan qori doonaa.
- Markaan.
- Markaan.

Nolosha ay maanta dad badan ku nool yihiin ayaa tan ah.

Markaan waxaan qabto. Kadib. Waqti aan helo. Markaas kadib ayaan waaxaan rabo sameyn doonaa.

Waxaa rabtid sameey ma xumo.

Laakin.

Yaa kuu balan qaaday waqtigaas oo dhan inaad heleysid?

Markaan. Markaan. Markaan.

Kalaamkaas wuxuu ka mid yahay. Kalaamada ugu badan ee dadka dunida maanta ku nool ay isticmaalaan.

Anigaa ka kow ah.

Waayo ereygaas. Sanado badan nolosheyda ka mid ah ayaan kusoo dhumiyay. Waxaan maanta qabsan karo ayaa barito u dib dhigi jiray. Sidii in ley balan qaaday oo kale bari inaan gaari doono.

Waqti.

Waqti ma heyno. Waqti wuu socdaa. Asagoo marka horeba Bani Aadam cimri gaabanaa. Ayaa hadane lasii kala hormaraa. Imisa qof ayaa da' gaarin. Imisa qof ayaa geeriyootay, iyagoo is leh.

''Markaan waxaan dhameeyo, kadib, ayaan waxaas iyo waxaas qaban doonaa.'' Dhamaanteena waxaan maanta qaban karno ayaa bari u dib dhignaa.

Ma ogtahay sheydaanka inuu beentaas inoo sheego. Anagane aan raacno. Aan ku jawaabno. Waad saxan tahay. Waqti badan ayaan heystaa. Barito ayaan qaban doonaa.

Ma u jawaabtid. Mana la hadashid sheydaanka.

Laakin dhaqankaaga ayaa ku tusinaya dhinacaas inaan adeecno sheydaanka. Oo ah, inaan wali waqti badan heysano. Cid loo sheegay ayaan jirin inta waqti uu heysto, iyo inta waqti u haray. Laakin waxaan u dhaqannaa sida, waqtiga inuu gacanta inoogu jiro oo kale. Sida saacad camal inuu waqtiga gacanta inoogu xiran yahay.

Imisa qof ayaa qabriyada ka buuxda. Geeriyootay, iyagoo is dhahayo. ''Barito ama xili dambe ayaa waxaan qaban doonaa.''

**Ilaahay Qur'anka wuxuu ku dhahay:**

- { يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ قُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا وَقُودُهَا ٱلنَّاسُ وَٱلْحِجَارَةُ عَلَيْهَا مَلَٰٓئِكَةٌ غِلَاظٌ شِدَادٌ لَّا يَعْصُونَ ٱللَّهَ مَآ أَمَرَهُمْ وَيَفْعَلُونَ مَا يُؤْمَرُونَ }
  Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra Naftiina iyo ehelkiinna naar. Lagu shido, dad iyo dhagax. Ay kana (shaqeeyaan) Malaa'ig adag, oo daran, oon Eebe ku caasineynin wuxuu faro, falana wixii la amro. [At-Taḥrīm: 6]

Ilaahay wuxuu na amray, inaan ka ilaalino nafteena iyo ehelkeenaba naar.

❖

Dhamanteena Ilaahay woxoo ina siiyay. Awood. Caqli. Aragti. Maskax. Fikrad. Wax garad. Inoo gaar ah. Qof walba awood gooni ah ayuu Ilaahay siiyay. Awoodeenii ayaan dayacnay. Taasna waxaa kaaga sii daran. Anagoo awoodeenii dayacnay, intaas inaan ku ekaanin. Ee waxaa kusii darsanay inaan u dhaqanno sida waqtiga in gacanta naloo geliyay oo kale.

Anigaa ka kow ah. Buugaan kaligiisa, hadaan kuu sheego mudada ay igu qaadatay inaan qoro, waad la yaabi doontaa. Buuga wax walbo aan ku qori lahaa woo ii diyaarsanaa. Fikradaha, cadeymaha. Wax walbo Ilaahay gacanta ayuu ii geliyay. Laakin anigaa marba marka ka dambeysa dib dhigaayay.

Maanta waa maalinta ugu horeyso aan bilaabay buugaan inaan qoro. Maalmaha ugu dambeysay oo dhan qalbigeyga ayeey ka guuxeysay inaan qoro buugaan. Laakin, hal tilaabo xitaa uma qaadin inaan qoro. Waan rabaa. Haye. Bis waaye. Intaas un ayeey ku ekeed. Rabitaan kaliya, makugu filmo.

Waa inaa dhaqan la imaadaa. Maanta ilaa iyo bari waad ku cabaadi kartaa. "Waxaan waan rabaa." Sidaad doontid ugu celceli. Laakin hadii aadan la imaanin dhaqan. Dhaqaaq. Dadaal, iyo waqti inaad siisid, ood waqti u sameysid.

Waligaaga waad rabi doontaa. Waxaaga rabitaan un ayeey ku ekaanayaan. Dhaqaaq ayaa loo baahan yahay.

Ilaahay swt koonkaan wuxuu u sameeyay qaab ah. Wax walbo aad dooneysid, waa inaad u dhaqaaqdaa. Hadii aadan adiga u tagin, oodan doonin, oodan raadinin, oodan isku dayin. Dhaqaaq iyo dadaal na aadan la imaanin. Waxaas cimrigaaga waad dooneysaa un. Faraqa ma kuugu soo dhacaayo. Intuu Ilaahay u idmay mooyaanee.

Ilaahay swt cidii uu doono ayuu umuuraha u sahlaa. Farajna wuu u furaa. Waxey doonayaanna fadhigooda ayuu ugu keenaa.

Laakin aniga waxaan ka hadlayaa dadkaan cadiga ah. Noloshaan caadiga ah. Aduunkaan aan ku nool nahay. Sunnada dunida aya sidaan ah. Waxaadan adiga u dhaqaaqin, makuu imaanayaan.

Libaaxa hadii uusan gurigiisa ka bixin. Waligiis ma ugaarsan doono. Hadii uusan ugaarsaninna, wax uu cuno ma helaayo. Haduusan helinna wuxuu cuno. Wuu dhimanayaa. Bani Aadamka waa sidaas.

Shimbirta arag. Subax walbo iyadoo baahan ayeey gurigeeda ka baxdaa. Wey duushaa. Quudkeeda ayeey soo raadsataa. Galabkiina waxey soo laabataa iyadoo dharagsan. Ay caloosha u buuxdo.

Ilaahay ayaa wax irzaaqo. Laakin asbaabta irzaaqda lagu helo ayaa ah, inaad shaqo tagtid. Dhaqaaqdid. Juhdi iyo dadaal la imaadid. Adigoo daalan guriga imaadid. Kadib Ilaahay wuu ku siinayaa wixii uu doono. Hadii uu idmo.

Taas waan isla garanay. Xaqa quudka, irzaaqda waaye. Laakin dadka badankooda waxey iloobaan, arinkaasi inuusan ku koobneyn irzaaqda un. Wax walbo aad doontid nolosha waa sidaas. Wax kuu imaanaayo malahan. Adiga waa inaad u dhaqaaqdaa. Dadaalkeeda la imaadaa. Badanaa taas ayaan ilownaa.

Tusaale ahaan. Hadii aad xaasle tahay. Ood xaas leedahay. Xaaskaaga cirka maka soo dhicin. Adigane ma dhihin kaliya.

”Ilaahayow qof aan guursado isii” oo, ’hoo, waa tanaa’ malagu dhihin. Adigaa u dadaalay. Waxaad raadisay gabar ku anfacda. Kadib ayaa gudo gashay inaad fiirisid, inaad gabadha dooqeeda tahay. Is barasho dheer kadib, ayaad waalidkeeda ka doonatay. Waad guursatay. Kadib ayaad caruur dhashay.

Waa sidii ninkii masaajidka ku dukan jiray oo kale. Oo mar walbo markii la duceynaayo, asigana dhihi jiray. ”Anigane igu duceeya, inuu Ilaahay caruur ii sahlo.” Mudo ayaa loogu duceynaayay inuu caruur dhalo.

Maalin ayaa la weydiiyay asi. ”Hebeloow, ducadaada wey badatee. Ee imisaad is qabtaan adiga iyo xaaskaaga?” Markaas ayuu dhahay. ”oo waliba ma guursanin”.

Dadkii yaab. Inaad caruur rabtid ma xumo. Laakin ilmaha, iyagoo duulaayaan daaqada maka soo galayaan. Adiga waa inaad guursataa. Ood dadaashaa. Kadib ayaad caruur dhali kartaa. Tanna waan isla raacsan nahay inay sidaan tahay.

Laakin maxaa inoo diiday inaan riyadeena, hadafkeena, nolosheena, waxaan dooneyno, waxaan dhab ahaan u rabno, qalbigeena wuxuu rabo inaan tilaabo u qaadin. Oo rabitaan un ku ekaano.

Dunidaan waxaan tilaabo loo qaadin ma rumoobaan. Riyadaada xaqiiji. Dhaqaaq la imow. U dadaal. Han iyo hadaf yeelo. Han sare waa inaad la imaadaa. Waad la yaabi doontaa awooda kugu duugan oo Ilaahay swt ku siiyay.

Awood Bani Aadamka uu Ilaahay siiyay ayaa jirto. Dadka badanaa waxey dhahaan, ”maxaan qaban karaa? Yaan ahay?” Qaarka inta kale ay dhahaan. ”Ilaahay ayaa isiinaayo. Xiliga Ilaahay oo doono ayeey dhacayaan waxaan rabo.

Markaas ayaan helayaa waxaan rabo. Markaas ayeey riyadeyda ii rumoobeysaa.” Laakin yaa ku dhahay Ilaahay wuxuusan doonin ayaa dunida ka dhaco. Cidna. Ilaahay swt koonkaan asagaa abuurtay.

Wax walbo dhaco. Wixii hore u dhacay. Waxa maanta dhacooyo. Waxa mustaqbalka dhici doono. Waxaan wali dhicin. Wixii dhici lahaa. Laakin aan wali dhicin. Loogu talo galin inay dhacaan. Hadii ay dhacaanne waxaas. Qaabkii ay u dhici lahaayeen. Xiligii ay dhici lahaayeen. Sababta ay u dhici lahaayeen Ilaahay ayaa og.

Wax walbo Ilaahay idinkiisa ayeey ku dhacaan. Taas waa ku saxan tahay. Xaga iska dhig.

Laakin waxaan ka hadleynaa. Awooda aadamiga ah oo Ilaahay ku siiyay. Yaan kaa maqlin. ''Awood miyaan leeyahay?''

Jawaabtaadu waa haa. Haa. HAAAAAAAAAAAAAA!!!!...

Qof walbo Ilaahay awood gaar ah ayuu u yeelay.

Ragaan diyaaradaha duuliya. Diyaaradaha sameeyay.

Mobeelka habeen iyo maalin aad jeebka ku wadatid. Aadan marna ka tagin. Cunugaaga camal ayaad u sidataa. Nolol mobeelkaas la'aanteeda waligaa maku fikirin.

Mobeelkaas? Haa. Kaas. Mobeelkaas. Qof Bani Aadam adiga camal ayaa sameeyay.

Social media. Baraha Bulshada. ''Car naga bixi'' ayaa la dhahaa. 24 sac waan isticmaalnaa. Qof adiga camal ayaa sameeyay. Maantane lacag ka sameeya.

Daaradaha dunida ku yaalo. Dawaqyada. Dubai ilaa iyo Maleysia. Africa ilaa iyo China. Yurub ilaa iyo Amerika. Wax walbo yaalo. Dawaq walbo dhisan. Dukaan walbo ku yaalo. Lacag walba oo taalo. Diyaarad walbo. Guri walbo. Maraakiibta. Shirkadaha. Iskoolada ka dhisan. Kuligood. OWNED.

Kuligood qof ayaa iskaleh. Qof magaciisa ayaa ku qoran. Hadii ay dadkaas oo dhan awoodaan. Adiga maxaa kuu diiday?

Noloshaan heerkaad rabtid ayaad ka gaari kartaa.

Taarikhdaada ma qorto mustaqbalkaaga. Wixii tagay wey tageen. Maanta ka bilow. Maanta. Haddadaan. Waad nooshahay. Waad neefsaneysaa. Isla xiligaan la joogo noloshaada wax ka badal. Waqti yuusan mar kale maalaa yacni kaaga bixin.

Naftaada ayaad been u sheegtaa. Waxaad dhahdaa barito ayaan qabanayaa. Si aad maanta u beerdareyso. Maskaxda wixii laga dhaadhacsiiyo ayeey qaadataa. Naftaada haka dhaadhacsiinin guuldaradaada iyo wax qabad la'aantaada.

Maanta jaanis ayaad heysataa. Fursadaad hada heysatid. Barito inaad heleysid yaa og. Maanta ka faaideyso. Hadaad nooshahay. Aakhiro iyo aduunyabo u shaqeyso.

Hada wax qabad la imow. Haddadaan. Intay fikrada maskaxdaada ku jirto. Qalbigaaga inta uu doonayo inuu wax qabto. Waayo waxaan ku nool nahay aduunyo mashquul badan. Maanta fikrada maskaxdaada ku jirto, hadii aadan qorin. Barito maku sii jireyso. Wax yaalo kale oo badan ayaa jaa maskaxdaada galay.

Hada wax qabad la imow. Intaad dareemeysid iftiinka, qalbigaaga iyo maskaxdaada ka guuxaya. Intaadan weynin.

❖

Xiligaan la joogo. Xili iga waqti yar ma jiro. Imtixaanaad ayaa ii bilaabanaya. Waqtiga ayaan xisaabinayaa. Maalin walba waxey dhamaataa, anigoo is leh ‘’waxba ma qabanin’’ wali liiska wuu ii buuxaa.

Daqiiqadaha ayaan xisaabiyaa. Isha saacada ayaan ku haayaa. Indhaheyga saacada maka jeystaan. Tik tik ta saacada ka yeereysa. Maskaxdeyda ayeey ka guuxeysaa. Meel aan wax ka bilaabo ayaan la’aa. Laakin Ilaahay ayaa mahada iskaleh.

Anigoo wax raadinaayo , wuxuu Ilaahay i tusiyay. Nin ka sheekeynaayay asigane. Dhibaatadeena sida looga gudbo. Oo ah dhibaatada waqtiga. Waqtiga maka faaideysano. Maalin walbo waxaan dhahnaa ‘’waqti ayaa inagu yar’’. Laakin tilaabo ma u qaadno. Waxna ma isku dayno inaa arintaas wax ka badalno.

Ninkii ayaa dhahay. Wadadaad mari laheyd inaad aragtid ma ahan. Hada ma u jeedaa tilaabadaada xigto. ‘’Haa’’ taas un lee qaad. Tilaabtaas un qaad. Mid kale inaad qaadid maloo baahno. Tilaabtaas markaad qaadid. Markaas kadib ayeey kuu muuqaneysaa, tilaabta kale aad qaadi laheyd.

Oo laga wado. Hada waxa ku hor yaalo dhamee. Shaqada kuu buuxdo oo dhan iska ilow. Hal mid un qabo. Waxa kale haka fikirin. Hashaas markaad dhameysid kadib ayaad kuwa kale qabaneysaa. Shaqadaada hal hal u qabo. Sidey u kala muhiimsan yihiin, u kala hormarsii.

Waad arki doontaa liiskii dheeraa inuu kala yaraado. Ogoow hadii aadan liiskaas kala yareynin. Oodan waxba qabanin. Liiskaas inuu sii bato ma ahanee, ma yaraanaayo.

Waayo maalin walbo waxey wadataa, shaqadeeda, dhibaatadeeda, hoosheeda, masuuliyadeeda, waajibaatkeeda iyo cibaadooyinkeeda.

Adiga hooshii shalay hadii aad maanta u dib dhigtay. Shalay 1 ayaad ka cabaadeysay. Maanta 2 ayee kuu noqdeen. Shalay wixii aad 24 sac ku qaban weysay, ayaad rabtaa 2 maalin howlahooda inaad ku qabatid 1 maalin. Adigoo tii shalay maanta ama bari u dhib dhigay.

Is xisaabi. Intaan lagu xisaabinin.

❖

Xiligaan la joogo aan buuga qoraayo. Indhaheyga ilin ayaa ka daadaneysa. Waan jareynayaa. Aniga dhan ayaa gariirooyo. Jirka oo dhan ayaa I jiriricoonaya. Ilinta ayaa iga socota. Sida qof masiibo loo soo sheegay oo kale. Meel maktabad ah ayaan kaligeyga fadhiyaa.

Buugaag un ayaa igu hareereysan. Dadka ayaan kasoo fogaaday. Meel shib ah ayaan helay. 1 miis oo 3 kursi ku wareegsan tahay. Cid kale meeshaan ma imaado. Mana joogto. Geeska ugu dambeeyo maktabada waaye. Shanqar ma jirto. Jawi dagan ayaan ku jiraa.

Maskaxdeyda. Nafteeda. Sheydaan. Wixii ay tahay ma ogi. Laakin waa sidii in ley dhahaayo oo kale. ”Buugaad qortay yaa aqrinaayo? Adigaaba sidaan ahee, sidee rabtaa dadka kale inaad wax ku bartid?”

Cadowgeena ugu weyn, waa nafteena. Waa sababta loo dhahay. Naftaada inaad la jihaatantid waaye. Waayo xumaanta ayeey ku faraysaa. Wanaag aduunyo iyo tu aakhiro makuu rabto.

Adiga waa inaad xakameysaa. Wax walbo ay ku dhahdo waa inaadan sameynin. Ilaahay awoodaas gacanteena ayuu inoo galiyay. Awooda ah doorashada. Adigaa dooran kara. Inaad ku dhaqaaqdid xumaanta ay naftaada ku fareyso. Ama inaad ka gaabsatid. Oo naftaada la dagaashid. Ood iska celisid.

Aniga hada kursiga ayaan isku celinayaa. Intaan soo bixin. Oo maktabada imaanin. Hooyadey ayaa igu dhahday. ”Intee u socotaa saacadaan. Subax waye. Maanta maa iska nasatid?” cajaladaas ayee sheydaanka ama nafteyda ii shidayaan. Oo ah. Hooyo cauurta ay dhashay wey dareemtaa. Hooyadaada ayaa daalkaaga aragtay. Ee maad warkeeda maqashid. Maad iska nasataid. Maxaa kaa waalay?

Sheydaanka iyo naftaada. Fursad un ayeey kugu gaadayaan. Ha u ogolaanin iney dib kuu dhigaan. La dagaalam. Ilaa aad ka maqli weysid. Waxa naftaada ku dhahaayo. ”Iska seexo.” Waxa dib kuu dhigaayo ilaa uu bada ka baxo. La jihaatan. Haba noqotee naftaada.

Maktabada ayaan ku jiraa. Indhaheyga ilin ayaa ka buuxdo. Dadka inay ilinteeda arkaan ayaan diidayaa. Ay is dhahaan, ”gabadhaan oyneyso caawi.”

Waxba ma iga qaldano. Anigoo indhaheyga ilinta ay ka socoto ayaan buugaan qorayaa. Ma ogi. Iney tani tahay waxay dumarka qabaan. Indho iska ilmeeya, bilaa sabab. Ama inay tahay markii ugu horeysay aan qalbigeyga dhageystay. Aan sameeyo waxaan intaas oo sano doonayay.

Oo ahaa, buugaan inaan qoro.

Dadka waa runtooda. Tilaabada ugu horeyso ayaa mar walbo ugu adag. Wax yar kahor. Waxaan qorsheenaayay, buugaan inaan qoro 2 sano kadib. Markaan waqti helo.

Markii ay wax ii kala toosaan. Laakin waxaan wada ognahay dhamaanteena. Mar walbo ay da’deena sii weynaato. Masuuliyadeena iney sii ziyaado. Awoodeena wax qabsiga inay sii yaraato. Waqtigeena inuu ciriiri sii noqdo. Waqti inaan weyno.

Dadka badanaa wey dhahaan. ”Dhalinyaro nimadada ka faaideyso.” Aniga qof walbo ayaa igu dhaho. ”Maxey tahay waqtiga kugu yar? Caruur miyaad heysaa? Reer miyaad masuul ka tahay?”

Anagaaba hada isla yaaban. Hadhow wey kasii daraysaa. Waligeey ma arkin qof dhahaayo, ”dhalinyarnimada waqti ma haaysid.”

Waayo adigoo waqti heynin xitaa, waxaa is weydiis laheyn. Barito waqtigaaga inuu kasii yaraan doono. Maanta ka faideyso waqtigaaga. Gaal iyo Muslim, taas wey isku raacsan yihiin. Intaan dhalinyaro tahay waqtigaaga ka faaideyso.

Aniga oo dhan waxaa dareemooyo ma garanaayi. Farxad iyo awood aan garaneynin ayaa jirkeyga ka guuxeysa. Sidii qof war farxad leh loo soo sheegay oo kale. Waxa kaliya aan qabtay ayaa ah. Inaan laptopka furo oo buug qor is dhaho. Ilaahay swt ayaa maskaxdeyda soo geliyay. Aniga maanan qorsheynin.

Saakay subixii waxaan meeshaan u imaaday waxey aheyd, imtixaanaadkeyga inaan barto. Laakin arag. Ilaahay wax ka fiican ayuu gacanta ii geliyay. Imtixanaadka barashadiisa wey i sugeysaa. Laakin waa marka ugu horeyso aan is dhahaayo. ”Buugaan dhameey. Haba noqoto 1 sac inaa maalintii siiyo. Ama 10 daqiiqo.”

❖

Nabiga scw woxoo dhahay ''ruuxii cilmi la weydiiyo oo qariya, ilaahay maalinta qiyaame xakamad naareed ayuu ku xakameeyaa''. Hadii uu ilaahay cilmi ku siiyay, umada gaarsii. Dad badan hakaa faaideystaan. Laga yaabo, qofaad cilmi bartay. Cilmigaasna ku dhaqmay.

Ajirka uu shaqeystay, adiga waxa kaasoo gaaro inuu noqon doono, midka Ilaahay oo kugu naxariisto. Janadiisa oo kugu geliyo. Waxba ha yareysanin. Cilmi waa cilmi. Baahida cilmiga loo qabo waligeed ma dhamaato.

❖

Hadaadan cadowgaaga garaneynin, ma iska difaaci kartid. Cadow aan loo jeedin, aysan indhuhu qabanin, inta iska celin karta ayaa aad iyo aad u yar.

Hadaanan ogeyn meesha lagaa weeraraayo, iyo halkee hubkooda la beegsanayaan. Ma iska difaaci kartid.

Haduusan cadow anaga naga dhashay nagu dhex jirin. Cadowga banaanka jooga, waxay naga qaadi karaan ayaa iska yar.

Hadii uu albaabka banaanka kuu xeran yahay. Banaanka waxa ka socdo maku soo gaari karaan. Hadii aan lahelin, cid gudaha ku jirta, oo furta albaabkaas. Una ogolaato cadowga banaanka jooga inuu gudaha inoo soo galo. Markaas ayeey halista guryaheena inoogu imaadaa.

Ilaahay swt caqli ayuu ku siiyay. Bani Aadam qaali ah, qiimeysan ayuu kaa dhigay. Wax kala saar. Garaadkaaga, aragtidaada, aqoontaada, cilmigaaga, waayo aragtinimadaada iyo qalbigaada wadaaji. Ku kala saar xumaan iyo samaanba.

Shey walba saar miizaanka Qur’anka iyo sunada.

Waxaa dad kusoo gaartay haiska raacin.

Dhaqan. Xujo ma ahan!

❖

System kaan, ama nidaamkaan la dajiyay waa mid waqtiga inaga dhuminaayo. Aduunyo kaliya ayaan ku mashquuleynaa. Nadaamkaan waa mid qarniyo badan lasoo daraaseynaayay. Maanta nidaamkaas ayaan ku noolnahay. Buugaan dhexdiisa nadamkaas waxaan ku magacaabi doonnaa system. Ama qaabkeey somalida u aqriso. ”Sistem”.

System kaan waa mid Bani Aadamka loo diyaariyay. Si loo burburiyo.

Hadii dib loo sii raaco, sheydaanka ayaa ka dambeeyo. Sheydaamul insi ayaa qarniyo ka shaqeynaayay systemkaan aan ku nool nahay maanta.

Waliba heer waxaan gaarnay aan u aragno nolosha dunida iney sidaan tahay. Ilaahay qaabkoo noo abuuray inay sidaan tahay. In system kaan uu yahay nidaam sharciyeeysan u dagan Bani Aadamka.

Bani aadam walba jidkaas ayuu qaadayaa. Halkaas wado un ayaa nala tusay. Wadadaas un ayeey indhaheena qabtaan. Inta wadooyin kale waa nalaga wada qariyay. Waa nalaga xeray. Anagoo yar yar ayeey nabu bilaabeyn inay system kaan na aaminsiiyaan.

Maanta iskaba dhaaf wadamada gaalada. Dunida oo dhan ayaa system kaan ku dhaqanto. Waa nadaam ay noo dejiyeen dad ka goostay, Allihii abuuray, diin, dhaqan iyo Bani Aadam nimo. Nidaam kaas, ama system kaas ay noo dejiyeen ayaan ku nool nahay.

Waliba waxaan gaarnay heer aanan ka fikirin, qorshaha laga leeyahay wuxuu yahay? Sirta ku jirta maxey tahay?. Waxa laga damacsan yahay waa maxay?

Maxey tahay sababta keentay in dowladaha dunida ugu awooda badan maanta iney intaas oo lacag ay geliyaan, suu usii jiro system kaan?

Buugaan waxaan si qoto dheer u dul istaagi doonnaa, waxa intaas oo sano nalaga qarinaayay. Ilaa iyo maanta aysan rabin inay dadka ogaadaan. Laakin hal wax bey iloobeen.

- وَمَكَرُوا۟ مَكْرًا وَمَكَرْنَا مَكْرًا وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ
    - Way Dhagreen Dhagar. Anagana waan Abaal marinay. Iyagoon Ogayn.

- { فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَـٰقِبَةُ مَكْرِهِمْ أَنَّا دَمَّرْنَـٰهُمْ وَقَوْمَهُمْ أَجْمَعِينَ }
    - Ee day Siday Noqotay Cidhibtii Dhagartooda. Anagaa Halaagnay. Iyagii iyo Qoomkoodiiba Dhammaan. [An-Naml: 50 - 51]

- { وَمَكَرُوا۟ وَمَكَرَ ٱللَّهُ ۖ وَٱللَّهُ خَيْرُ ٱلْمَـٰكِرِينَ }
    - Way dhakreen. Eebana wuu ka abaalmariyey. Eebana u wanaagsan wax abaal mariya. [Āli-ʿImrān: 54]

❖

Qorshe walbo lala damacsan yahay umad dhan in lagu dhibaateeyo. Ugu dambeyn wuu burburaa. Ilaahay wuu kashifaa cida ka dambeysa.

Hada qorshahooda waxaa ka muuqdo inuu firir soo galay. Dildilaac ayaa ka muuqda. Dadka sidii hore ma ahan. Qorshahooda un ayuu Ilaahay u bandhigayaa umada.

System kaan hadii il gaar ah lagu fiiriyo. Oo loo fiirsado. Oona laga fikiro. Hal wax ayaa inoo cadaaneysa. In qorshahaan iyo halahaas dadaal oo dhan ay u gelinayaan, si ay dadka Ilaahay uga fogeeyaan. Kufri iyo fisqi ayeey umada ku faafinayaan.

Dadkii ayeey rabaan inay noqdaan, kuwo aduunyo un u shaqeysta. Aakhiro ay waxba u yaalin.

Wax walbo aad buugaan ku aqrin doontid waxaad ka arki doontaan, iney kuligood hal meel ku wada dhamaadaan. Ayna hal meel kasoo bilowdeen. Kaasoo ah Sheydaanka. Cadowtinimada oo Bani Aadamka u qabo ma sahlana. Ilaahay sw Qur'aankiisa ayuu hore inoogu sheegay.

Sheydaanka waa ninkii aabaheena Nabi Aadam cs Janada kasoo saaray. Taasna maku ekaanin cadowtinimadiisa. Haduu Ilaahay ka badbaadiyay Nabi Aadam cs dhagarta Sheydaanka. Sheydaanka meeshaas maku ekaanin.

Wuxuu illaa iyo maanta ku gudo jiraa. Qaabkii uu caruurta Nabi Aadam cs naarta ugu wada guri lahaay. Ilaahay waa Qafuur Raxiim. Cidii uu doono ayuu Naxariistiisa geliyaa. Sheydaanka wuu ogyahay. Inuusan waxba ku dhibaateyn karin Bani Aadamka. Wixii uu Alle weyne idmay mooyee.

❖

Aayadahaan si fiican u aqri. Maskaxdaada geli. Waxaad arki doontaa dhagar walbo ay maanta falayaan gaalada iyo sheydaanka. Inuu Ilaahay swt mar hore inoogu digay.

Aayad walbo oo Qur'aanka ka mid ah, markaan soo qaato. Waxaan hoos ka dhigayaa tusaale yar.

Tusaale ku tusinaya, sheydaanka wadadiisa inay dadka raacayaan. Taasoo isla markaasna ah, inay digniin tahay. In yar ayaan dul istaagi doonnaa. Anagoo si dheer u gudo geli doonin.

Tusaale yar, ayaan aayad walbo hoos dhigayaa. Si aan si fiican u fahamno, halka ay arinta u socoto. Tusaalahaas ayaa ah, waxaan aniga aayada ka fahmay. Markaan fiiriyo nolosha maanta aan ku nool nahay. Iyo wax yaalaha agagaaraheena ka dhacaayo.

Aayadaha fisiraadooda masii gudo geli doonno. Kaliya tusaale yar, oo aniga aayada aan ka fahmay, ayaan hoos dhigi doonnaa. Saan u fahamno waxa dunida maanta ka dhacaayo.

❖

**Ilaahay swt Qur’an kiisa woxoo inoogu sheegay.**

- يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ كُلُواْ مِمَّا فِي ٱلۡأَرۡضِ حَلَٰلٗا طَيِّبٗا وَلَا تَتَّبِعُواْ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيۡطَٰنِۚ إِنَّهُۥ لَكُمۡ عَدُوّٞ مُّبِينٌ }

Dadoow cuna waxa Dhulka ku sugan, kiisa xalaasha fiican ah. Hana raacina Wadooyinka Sheydaanka. Illeen Cadaw cad buu idiin yahaye. [Al-Baqarah: 168]

*Dadkii oo xalaasha ka taga. Dadka oo xaaraanta cuna.*

*Waxaa jiro dad xalaasha cuna. Laakin xalaashaas kusoo iibsada lacag ay xaaraan ku shaqeysteen. Maalka xaaraanta oo la shaqeysta. Qaab keey rabaan haku helaan maalkaas, haba noqoto inay soo dhacaan.*

*Lacag xaaraan ah shey xalaal ah hadaad ku gadatid, marna sheygaas xalaal maka dhigeyso.*

*Wadooyinka sheydaanka aan raaceyno, waxay noqon kartaa inaanan ku dhaqmin wuxuu Ilaahay ina faray. Aana ka tagin wixii nala faray inaan ka fogaano.*

- يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱدۡخُلُواْ فِي ٱلسِّلۡمِ كَآفَّةٗ وَلَا تَتَّبِعُواْ خُطُوَٰتِ ٱلشَّيۡطَٰنِۚ } إِنَّهُۥ لَكُمۡ عَدُوّٞ مُّبِينٞ {

Kuwa xaqa rumeeyow, u gala Islaamka dhammaan (kuna camal fala) hana raacina waddooyinka Shaydaanka, wuxuu idiin yahay col Cad. [Al-Baqarah: 208]

*Dadka oo diinta qeyb un ka qaata. Dadka ayaa diinta u isticmaalaya danahooda gaar ka ah. Say hool aduunyo ugu fulistaan.*

*Sida dhaqanka oo kale. Wax yaalo badan ayaa jiro, dadka dhaqan u ah. Laakin ay diinta ogoleyn.*

*Dadkii oon ka tagin dhaqankaas. Iyagoo ku dhahaya. ''hido iyo dhaqan ayuu noo yahay.''*

*Sida dharka Somalida hidaha iyo dhaqanka u ah oo kale, qaar badan oo dharkaas dumarka ka mid ah, astur ma ahan. Halka uu Ilaahay naga amray, inaan is asturno oon xijaabano.*

*Tusaale kale wuxuu noqon karaa, dadka is qaba. Rag badan ayaa jiro xaasaskooda arintaan u isticmaala. Diinta waxay amartay oo asaga dantiisa ah, ayuu xaasaskiisa ka doonayaa. Wixii asaga dushiisa la saaray, oo waajibaat ahaayna asaga oo fulineynin.*

*Waalidiinta ayaa arinkaan isticmaalo. Xuquuqda waalidiinta uu Ilaahay siiyay un ayeey bartaan. Marna ma bartaan xuquuqda caruurtooda ay ku leedahay. Waajibaatka ilmahooda ka saaran ma fiiriyaan.*

- { ٱلشَّيۡطَٰنُ يَعِدُكُمُ ٱلۡفَقۡرَ وَيَأۡمُرُكُم بِٱلۡفَحۡشَآءِۖ وَٱللَّهُ يَعِدُكُم مَّغۡفِرَةٗ مِّنۡهُ وَفَضۡلٗاۗ وَٱللَّهُ وَٰسِعٌ عَلِيمٞ }

Shaydaanku wuxuu idiin yaboohi faqri. Wuxunna idin fari xumaan. Eebana wuxuu idiin yaboohi dambi dhaaf iyo Fadli. Eebana waa waasac (Deeqdiisu) waxna og. [Al-Baqarah: 268]

*Qaabab badan oo sheydaanka dadka kusoo galo ayaa jirto. Qaabkaan waxay noqon kartaa.*

*Dad badan ayaa jiro oo ka cabsada mustaqbalka. Waxa dhici doono. Shar un ayeey filadaan. Cabsidaas sheydaanka ayeey ka imaaday.*

*Ileen sheydaan kaba yaa u sheegay waxa dhici doono. Cilmiga qeybka ah Ilaahay kaligiisa ayaa og. Cilmigaas cid la siiyay ayaan jirin. mustaqbalka waxa dhici doono cid og malahan. Sheydaanka ku cabsi gelinaya xitaa ma ogo waxa dhici doono.*

*Sidoo mustaqbalka kaaga cabsi gelin karaa, xaalo uusan asigaba ogeyn waxa dhici doono.*

*Waalidiinta oo ka fikira oona u cabsada mustaqbalka caruurtooda. Dunidaan oo laga fikira waxa dhici doono.*

- { إِنَّمَا ذَٰلِكُمُ ٱلشَّيۡطَٰنُ يُخَوِّفُ أَوۡلِيَآءَهُۥ فَلَا تَخَافُوهُمۡ وَخَافُونِ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ }

Kaasi waa Shaydaan. Wuxuuna idinku Cabsi Galin Awliyadiisa (Saaxiibadiis) ee ha Cabsanina, ee iga Cabsada Haddaad Mu'miniin tihiin. [Āli-ʿImrān: 175]

*Dadka oo ku noolaada nolol cabsi leh.  Shey walba ay dadka ka cabsadaan. Iyadoon u muuqanin wax cabsi geliya.*

*Wax yaalaha aan ka cabsano, inta badan ma mudna in laga cabsado. Sheydaan ayaa nafteena dhibaayo ma ahanee, sheygaas wax laga cabsado ma ahan.*

*Ilaahay hadii aad ka cabsatid. Waxaad ka xoroobeysaa, cabsi walbo oo dunida ka jirto. Ileen Allaha aad ka cabsatid oo ku abuuray, aad caabudid ayaa ah. Allaha shey walba abuuray.*

*Shar iyo kheyr, Ilaahay ayaa abuuray. Kheyr ka Ilaahay ayaad weydiisaneysaa.*

*Sharta Ilaahay ayaad ka magan galeysaa. Hadii aad arinkaan naftaada iyo maskaxdaada gelisid, ood ka dhaadhacsiisid. Waxaad arki doontaa, ineysan jiri doonin, wax adiga ku cabsi galiya.*

- وَٱلَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمۡوَٰلَهُمۡ رِئَآءَ ٱلنَّاسِ وَلَا يُؤۡمِنُونَ بِٱللَّهِ وَلَا بِٱلۡيَوۡمِ ٱلۡـَٔاخِرِۗ وَمَن يَكُنِ ٱلشَّيۡطَٰنُ لَهُۥ قَرِينٗا فَسَآءَ قَرِينٗا }

Iyo kuwa u bixiya Xoolahooda istuska. Dadka oon rumeyn Eebe iyo Maalinta Dambe. Ruuxii shaydaan u noqdo saaxiib wuu xumaaday Saaxiibkiis. [An-Nisāʾ: 38]

- أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ يَزۡعُمُونَ أَنَّهُمۡ ءَامَنُواْ بِمَآ أُنزِلَ إِلَيۡكَ وَمَآ أُنزِلَ مِن قَبۡلِكَ يُرِيدُونَ أَن يَتَحَاكَمُوٓاْ إِلَى ٱلطَّٰغُوتِ وَقَدۡ أُمِرُوٓاْ أَن يَكۡفُرُواْ بِهِۦۖ وَيُرِيدُ ٱلشَّيۡطَٰنُ أَن يُضِلَّهُمۡ ضَلَٰلَۢا بَعِيدٗا }

Ka warran kuwa Sheegan inay rumeeyeen waxa lagugu soo dejiyey, iyo waxa lagu Dejiyey kuwii kaa horreeyay. Oo ku Xukuntami Shaydaan. Iyagoo la faray inay diidaan. Wuxuuna dooni Shaydaanku inuu Baadiyeeyo Baadi Fog. [An-Nisāʾ: 60]

*Tusaale ahaan, dadka oo u dooda dhaqan xumada, xuquuqda dumarka. Wax yaalo kale oo badan, uusan Ilaahay raali ka aheyn.*

*Ilaahay swt xuquuq dumarka wuu siiyay. Laakin tay dadkaan u doodayaan ayaa ah, mid diinteena aysan raali ka aheyn. Sida dumarka inay raga la dhinactamaan, in ay dharka tuurtaan.*

*Gaaladaan ayaa u arka. Haweenkii asturan in la silciyay, oo xuquuqdoodii laga qaatay.*

*Kuwa qaawan ayeey u arkaan, inay yihiin dad xor ah. Oo xuquuq leh.*

*Goormeey noqotay xuquuqda, wuxuu Ilaaahay inaga xarimay.*

*Diinteena dhinac walbo ayeey ka dhameystiran tahay.*

*Xuquuq ay gaalo inoo dhigeyn, baahi uma qabno. Ka badan oo ka fiican ayaan heysanaa, oo jano aan ku heleyno.*

- { ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ يُقَـٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱللَّهِ ۖ وَٱلَّذِينَ كَفَرُواْ يُقَـٰتِلُونَ فِى سَبِيلِ ٱلطَّـٰغُوتِ فَقَـٰتِلُوٓاْ أَوْلِيَآءَ ٱلشَّيْطَـٰنِ ۖ إِنَّ كَيْدَ ٱلشَّيْطَـٰنِ كَانَ ضَعِيفًا }

Kuwa (Xaqa) rumeeyey waxay ku Dagaallami Jidka Eebe. Kuwa Gaaloobayna waxay ku Dagaallami Jidka Shaydaanka. Ee la dagaallama Sokeeyaha Shaydaanku. Dhagarta Shaydaanku waa tabar yaryahaye. [An-Nisāʾ: 76]

*Ilaahay xaqa maka xishoodo. Inaan anaga ka xishoono ma ahan.*

*Gaaladaan hadii aysan ka xishoonin inay nasoo weeraraan. Anagane waa inaanan ka xishoonin inaan iska difaacno.*

*Cabsi ma jirto. Iyaga midey inagu abuureyn ma ahanee. Cabsidaas ayaa iyaga u siisay awood ay dalalkeena ku maamulaan, umadeena ku dhameeyaan. Dhiigoodane ay u daadiyaan.*

*Gaaladaan wey midoobeen. Dhiiga Muslimiinta ayeey baneysteen. Anagane waa inaa iyaga iska difaacnaa.*

*Qorshahooda faham. Kadibna gudo gal saad iskaga difaaci laheyd.*

- { وَلَأُضِلَّنَّهُمْ وَلَأُمَنِّيَنَّهُمْ وَلَـَٔامُرَنَّهُمْ فَلَيُبَتِّكُنَّ ءَاذَانَ ٱلْأَنْعَـٰمِ وَلَـَٔامُرَنَّهُمْ فَلَيُغَيِّرُنَّ خَلْقَ ٱللَّهِ ۚ وَمَن يَتَّخِذِ ٱلشَّيْطَـٰنَ وَلِيًّا مِّن دُونِ ٱللَّهِ فَقَدْ خَسِرَ خُسْرَانًا مُّبِينًا }

Waan baadiyeyn. Waan yididiilo (Xun) galin. Waana fari (Xumaanta) waxayna jeex jeexi Dhagaha Xoolaha. Waana fari (Xumaanta) waxayna doorin abuurka Eebe. Ruuxii ka yeesha shaydaan Wali. Eebe ka sokow. Dhab ahaan buu u Khasaaray. Khasaare Cad. [An-Nisāʾ: 119]

*Waan u jeednaa waxa maanta dunida ka dhacayaan ineysan aheyn kuwo cusub. Sheydaanka ayaa qorshahiisa fulisanaayo.*

*Ilaahay swt naxariistiisa. Qur'aankiisa ayuu inoogu sheegay, sheydaanka qorshahiisa.*

*Hadii aan wax yar dul istaago. Adigoo fiiro gaar ah u yeelanaayo. Waxa dunida maanta ka socda ayaa ah.*

*Dadka oo dhan in la mashquuliyay. Aakhiro iyo aduunyo ayeey ka mashquuleen. Dadkii ayaa ku mashquulay xumaanta. Umada ayaa ku nool nolol qiyaali ah. Nolol dhalanteed ah. Nolol ay maskaxdooda ka sameysteen. Mid dhab ah ma ahan. Sida nolosha baraha bulshada ka jirta oo kale. Games, filimaanta, heesaha, tv. Nolosha online ka jirta.*

*Waxaas oo dhan waa mid adiga laguugu mashquulinaayo. Dantaada aakhiro iyo tii aduunyo ayaa lagaaga mashquulinooyaa.*

*Xumaanta sheydaan ka wuu na faraa. Waliba waxaa soo batay, sheydaanul insi. Dad shayaadiinta shaqadooda u qabto. Dadkaas oo umada ku faafiya xumaanta. Iyagoo ka raadinaaya, xoogaa lacag, magac iyo aduunyo.*

*Abuurkii Alle waa la badalaa saad u jeedid. Maanta dunida waxa ka socdo fiiri. Maxaad aragtaa?*

*Dad is cadeeya, dad qaliin u gala say jirkooda u badalaan. Shabada, dad is dheereeya, dad qaliin u gala say u noqdaan haweeney ama rag. Transgender. Sidii uu Ilaahay ku abuuray ayuu iska badalay. Qaliimo ayuu galay. Suu wax kale u noqdo.*

*Abuurkii Alle ayeey badalayaan. Waxaa kuusii dheer. Qofkii sheydaan saaxiib ka dhigta inuu hasaaray. Taasina waan aragnaa. Dadka wadadaan raaca. Hadii aysan ka towbad keenin, meesha ay ku dhamaadaan waan aragnay.*

*Waxay noqdaan dad nolosha ka dhacay. Aakhirkii iyagaa is dila. Haduusan Muslim aheyn, uusan Alle badbaadinin.*

*Maalmo ka hor waxaan arkay haweeney. Haweeney ayaan u maleeyay. Waxay aheyd nin. Nin ahaan ayuu Ilaahay u dhaliyay.*

*Markaas kadib ayuu qaliin galay, suu haweeney u noqdo. Aakhirkii wuu noqday haweeney.*

*Jirkeeda oo dhan waxaa ka buuxay shabad. Sidii ay bada ula sii fogaaneysay. Hada waa haweeney jirkeeda ka ganacsata. Meelahaas ayeey lacag ka sameysaa. Nolol maalmeedkeeda ayeey xagaas ka raadisaa.*

*Wali lama arkin, qof sheydaanka adeecay oo guuleystay. Gaaladaan ayaa doonaya inaan wadada sheydaanka raacno. Ileen iyaga ayuu bohol ka tuuray. Bada in lala galo ayeey doonayaan.*

*Ileen. Mudul gubtay, mudul gubtay maka naxo.*

- يَعِدُهُمۡ وَيُمَنِّيهِمۡۖ وَمَا يَعِدُهُمُ ٱلشَّيۡطَٰنُ إِلَّا غُرُورًا

Wuu u yaboohi, oo yididiila galin. Mana yabooho shaydaan waxaan dhagar ahayn. [An-Nisāʾ: 120]

- { إِنَّمَا يُرِيدُ ٱلشَّيۡطَٰنُ أَن يُوقِعَ بَيۡنَكُمُ ٱلۡعَدَٰوَةَ وَٱلۡبَغۡضَآءَ فِي ٱلۡخَمۡرِ وَٱلۡمَيۡسِرِ وَيَصُدَّكُمۡ عَن ذِكۡرِ ٱللَّهِ وَعَنِ ٱلصَّلَوٰةِۖ فَهَلۡ أَنتُم مُّنتَهُونَ }

Wuxuu uun Dooni Shaydaanku. Inuu Idinku Dhex tuuro Colnimo iyo isnac. Khamrada iyo Qamaarka. Idinkana Celiyo Xusidda Eebe, iyo salaadda. Ee ma ka Joogaysaan (ka Jooga). [Al-Māʾidah: 91]

*Waad u jeedaa. Dalkeena fiiri. Somaliya arag. Dadkeena iyagaa is dhameeyay. Cadow ayaa soo dhex galay. Markaasaa laga faaideystay. Dadkii ayaa is dhameeyay. Ilaa iyo maanta dhibtaan wey ina heysataa.*

*Qabiil. Dalkeena iyo dadkeena ayuu dhameeyay. Ilaa iyo maanta inta ka harta ayaa iska yar.*

- { وَلَا يَصُدَّنَّكُمُ ٱلشَّيۡطَٰنُۖ إِنَّهُۥ لَكُمۡ عَدُوّٞ مُّبِينٞ }

Yuuna idinka leexinin Shaydaan (Jidka) wuxuu idiin yahay Col cad. [Az-Zukhruf: 62]

- { ٱسۡتَحۡوَذَ عَلَيۡهِمُ ٱلشَّيۡطَٰنُ فَأَنسَىٰهُمۡ ذِكۡرَ ٱللَّهِۚ أُوْلَٰٓئِكَ حِزۡبُ ٱلشَّيۡطَٰنِۚ أَلَآ إِنَّ حِزۡبَ ٱلشَّيۡطَٰنِ هُمُ ٱلۡخَٰسِرُونَ }

Waxaa ka qaalib noqday Shaydaan, oo hilaamsiiyey xusidda Eebe. Kuwaasi waa Xisbiga shaydaanka. Xisbiga shaydaankuna waa kuwa khasaaray. [Al-Mujādilah: 19]

- { إِنَّمَا ٱلنَّجۡوَىٰ مِنَ ٱلشَّيۡطَٰنِ لِيَحۡزُنَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ وَلَيۡسَ بِضَآرِّهِمۡ شَيۡـًٔا إِلَّا بِإِذۡنِ ٱللَّهِۚ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلۡيَتَوَكَّلِ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ }

Faqa xun Shaydaan buu ka yimaaddaa. Suu u walbahaar geliyo kuwa xaqa rumeeyay. Waxbase kama dhibo idan Ilaahay Mooyee. Ilaahay uun ha tala saarteen, kuwa xaqa rumeeyey. [Al-Mujādilah: 10]

- { كَمَثَلِ ٱلشَّيۡطَٰنِ إِذۡ قَالَ لِلۡإِنسَٰنِ ٱكۡفُرۡ فَلَمَّا كَفَرَ قَالَ إِنِّي بَرِيٓءٞ مِّنكَ إِنِّيٓ أَخَافُ ٱللَّهَ رَبَّ ٱلۡعَٰلَمِينَ }

Waxay la midyihiin Shaydaan. Waa ka dadka gaalow ku dhaha. Markay gaaloobaanna, ku yidhaah. Bari baan kaa ahay. (waxba isuguma keen jiraan) oo sheega inuu Ilaahay ka yaabi. [Al-Ḥashr: 16]

- { وَإِمَّا يَنزَغَنَّكَ مِنَ ٱلشَّيۡطَٰنِ نَزۡغٞ فَٱسۡتَعِذۡ بِٱللَّهِۖ إِنَّهُۥ هُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡعَلِيمُ }

Hadduu ku waswaasiyo shaydaan. Xaggiisa waswaasiye ka magangal Eebe isagaa wax maqla waxna oge. [Fuṣṣilat: 36]

❖

Aayadahaan ayaa ah, aayado Qur’aanka ka mid ah. Suuradaha ay ku kala jiraan, waan ku ag qoray.

Hadii si fiican loogu fiirsado, wax walbo oo dunida maanta ka dhacaaayo. Waa wax yaalo badan uu Ilaahay swt hore inoogu digay.

Markaan buugaan si qoto dheer u dul istaagno, ayaad arki doontaa, wax walba oo maanta dunida ka dhacayaan iney hal meel un ku dhamaadaan.

Taasoo ah. Qorshaha uu sheydaanka Bani Aadamka ka damacsan yahay inay tahay.

Waxa dunida maanta ka socdo, si aad si fiican ugu fahamtid. Waxaan kasoo bilaabayaa, halkii uu dagaalka ka bilowday. Cadowtinimada oo Sheydaanka inoo qawo halka ay kasoo bilaabatay.

Markaad arinkaan fahamtid kadib. Ayaa waxaad u yeelan doontaa awood aad si fiican ugu sii fahamtid, waxa dunida maanta ka socdo. Oo fiiro gaar ah ayaad u yeelaneysaa.

Ilaahay swt ayaa Qur’aankiisa inoogu sheegay.

❖ **Balantii uu sheydaanka la galay Ilaahay swt.**

Ilaahay ﷻ woxoo Qur'aankiisa inoogu sheegay. Suurada Saad. Suurada 38. juzka 23. Aayada (67-88)

- ﴿قُلْ هُوَ نَبَؤٌا۟ عَظِيمٌ ﴿٦٧﴾ Waxaad dhahdaa Nabiyow. Quraanku waa war weyn.
- أَنتُمْ عَنْهُ مُعْرِضُونَ ﴿٦٨﴾ Ood idinku ka jeedsaneysaan.
- مَا كَانَ لِىَ مِنْ عِلْمٍۭ بِٱلْمَلَإِ ٱلْأَعْلَىٰٓ إِذْ يَخْتَصِمُونَ ﴿٦٩﴾ Mana ogayn shirka sare (malaa'igtu) markey doodayaan (Haddaan waxyi jirin).
- إِن يُوحَىٰٓ إِلَىَّ إِلَّآ أَنَّمَآ أَنَا۠ نَذِيرٌ مُّبِينٌ ﴿٧٠﴾ Waxaa uun ley waxyoodey, inaan ahay dige muuqda.
- إِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَـٰٓئِكَةِ إِنِّى خَـٰلِقٌۢ بَشَرًا مِّن طِينٍ ﴿٧١﴾ Xusuuso. Markuu Eebe ku yidhi malaa'igta. Anigu waxaan ka abuuri dadka (Aadam) Dhoobo.
- فَإِذَا سَوَّيْتُهُۥ وَنَفَخْتُ فِيهِ مِن رُّوحِى فَقَعُوا۟ لَهُۥ سَـٰجِدِينَ ﴿٧٢﴾ Ee markaan ekeeyo. Oon ku afuufo Ruuxdeyda ugu dhaca sujuud (salaan).
- فَسَجَدَ ٱلْمَلَـٰٓئِكَةُ كُلُّهُمْ أَجْمَعُونَ ﴿٧٣﴾ Wayna sujuudey malaa'igtii dhamaantood oo idil.